

Waxa aan ku weydiinayno markaad ka codsaneyso gunnada shaqo la'aanta khadka tooska ah ee oonleenka ah.

Waxaad u baahan tahay inaad na siiso macluumaad gaar ah haddii aad ku dalbanayso dheefaha shaqo la'aanta khadka tooska ah ama telefoonka.

waxaad u baahantahay:

- **Lambarkaaga Amaanka Bulshada (Social Security).** Sharciga Federaalku waxa uu kaa rabaa inaad keento tan si aad u hesho gunnooyinka.
- **Magaca iyo ciwaanka loo-shaqeeyahaagii ugu danbeeyay,** iyada oo aanay muhiim ahayn wakhtiga aad u shaqaynaysay iyo nooca shaqada aad u qabanaysay.
- **Taariikhda ugu danbaysay ee aad u shaqaysay** loo shaqeeyahaagii u danbeeyay. Nidaamkayagu ma aqbalo taariikhda aan wali la gaadhin. Haddii aad wali shaqaynayso, waxaad isticmaali kartaa taariikhda aad codsatay.
- **Magacyada iyo ciwaanada dhamaan loo shirkadii aad u shaqaynaysay labadii sano ee u danbeeyay.** Waa inaad qortaa dhamaan loo shaqeeyayaashaadii labadii sano ee u danbeeyay. Codsashada online ka ah, waxa jira qol lagu diwaan galin karo ilaa 16 loo shaqeeye. Haddii aad u shaqaysay in ka badan 16 loo shaqeeye 2 dii sano ee u danbeeyay, waa inaad sheegashadaada ku xaraysaa taleefan adiga oo wacaya xarunta dalabyada.
- **Taariikhda u shaqanaysay dhamaan loo shaqeeyayashaas.** Adeegso qiyaastaada ugu fiican haddii aadan xusuusan taariikhda saxda ah. Waa inaad nagu soo wargalisaa macluumaadkan maxaa yeelay cidda aad u shaqayso maahan. Waxay kaliya noo sheegayaan xogta mushaarkaaga iyo saacadaha aad shaqaysay.
- **Haddii aad caadiyan shaqadaada ka hesho urur shaqaale** sheeg **magaca** iyo lambarka maxaliga ahee ururkaaga.
- **Haddii aad ka mid ahayd militariga labadii sano ee la soo dhaafay,** sheeg **DD214**, keen nuqul xubin ka mid ah 2 ilaa 8.
- **Haddii aad ahayd shaqaale federaal ah labadii sano ee u danbeeyay,** bixi **Foomka caadiga ah ee 8** (Standard Form 8, SF8)-- Ogeysiis Ku Socda Shaqaalaha Federaalka ee Ku Saabsan Caymiska Shaqo La'aanta (Notice To Federal Employees About Unemployment Insurance) iyo **Foomka caadiga ah ee 50** (Standard Form 50, SF50)-- Ogeysiiska Waxqabadka Shaqaalaha (Notice of Personnel Action) looma baahna laakiin waxay dedejineysaa ka shaqeynta sheegashadaada.
- **Hadii aanad ahayn muwaadin maraykan ah,** bixi **labmkara diwaangalinta shisheeyenimo** ee ay soo saartay laanta adeega muwaadinimada iyo socdaalka (United States Citizenship and Immigration Services, USCIS).

Ha sugin inaad dalbato, xitaa haddii aadan haynin dhammaan macluumaadka. Sheegashadaadu waa mid dhaqan galaysa Axada todobaadka ugu horeeya ee aad codsatay.

Waxaanu ku waydiin doonaa dhawr su'aalood markaad codsato Nidaamku wuu kala duwanyahay, isaga oo ku xidhan kolba sida aad u codsatay, khadka tooska ah (oonleenka) ama taleefan Waxaad samayn kartaa inaad dib u eegis ku samayso arjiga muunada ah ama su'aalaha taleefanka si aad u diyaariso una ururiso macluumaadka si uu kaaga caawiyo inaad dhamaystirto nidaamka.

[Ku laabo bogga gunnada shaqo la'aanta \(Unemployment\)](#)

[Akhriso bayaanka ilaalinta amniga shaqada \(Employment Security\)](#)

Employment Security Department (Waaxda Amaanka Shaqada) waa barnaamij/shaqo abuure baxsha fursad loo siman yahay. Taageerooyinka kaalmaatiga iyo adeegyadu waa diyaar markii ay codsadaan shaqsiyaadka naafada ah. Adeegyada caawimaada luuqada ee dadka aan si fiican u aqoon luuqada Ingiriiska ayaa si bilaash ah lagu helayaa. Adeegga Dhagoolayaasha Washington: 711